

KU DHAQAN XAFIIS D.



# Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIIKA SOMALIYA

Sanadka I

Moqdisho Tr. 1 Dicembre 1973

L. 23

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

## FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibadedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOBNIIN

### BOGGA KOOWAAD

#### SHARCI

SHARCI L. 14 Tr. 11 Nofembre 1973 — *Dhismaha Wakaaladda Ganacsiga Xoolaha.*

Bog. 425

### BOGGA LABAAD

#### XEER DOWLADEED

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 10 Settember 1973, L. 107 — *Dallacaad Saraakiil Boliska ah.*

» 429

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 10 Nofembre 1973, L. 108 — *Isbaddelkii Afraad ee Miisaaniyadda Sannadkan 1973 (4th Virement of the 1973 Budget).*

» 430

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, 14 Nofembre 1973, L. 109 — *Xeerka Ajuurada Maxkamadaha.*

» 433

- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3 Settembre 1973, L. 110 — *Dhul la siiyay Xaji Farax Cali Cumar, ku fadhiya 900 mdh. Kuna yaal Hodan.* Bog. 436
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 15 Settembre 1973, L. 111 — *Siismo dhul Dawladeed la siiyeya Dr. Cabduraxman Xaji Murshid.* » 437
- XEER WASAARADDA HAYLAHA GUUD, 13 Ottobre 1973, L. 112 — *Siismo dhul la siiyey Somali Comercial Bank, Ku yaal Muqdisho Degmada Hodan.* » 438
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUU, 16 Ottobre 1973, L. 113 — *Hanti wareeg guri ay leeyihiin Cali Axmed Moxamud Moxamed Dalfa, Caddow Axmed Moxamud Moxamed Dalfa, Moxamed Axmed Moxamud Moxamed Dalfa iyo Xasn Axmed Moxamud Moxamed Dalfa, Ku yaal Muqdisho Xafa Bondhere.* » 439
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 18 Ottobre 1973, L. 114 — *Siismo dhul lassiiyey Taliska Nabad Suggidda Somaliyed, (N.S.S.). Kuna yaal Muqdisho Xafadda Wadajir.* » 440
- XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA, 23 Settembre 1973, L. 115 — *Qiimaha Alaabta Dhismaha.* » 441

---

**BOOGA SEDEEXAAD**

**TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH**

- DUUDUUBKA SHARIKADDA PRODMA LTD. KIS-  
MAAYO L. 200 bis. Bog. 442
-

## **BOGGA KOOWAAD SHARCIYO**

SHARCI L. 14 Tr. 11 Nofember 1973.

Dhismaha Wakaaladda Ganacsiga Xoolaha.

### **GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ISAGA OO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

### **WUXUU DHAQAN GELINAYAA**

Sharciga soo socad:

#### **GAYBTA I.**

Qodobka 1aad

*Habka Guud*

1. Wakaaladda Ganacsiga Xoolaha ayaa halkan lagu dhisay hadda iyo wixii ka dambeeya waxaa lagu magacaabi doonaa «Wakaaladda».
2. Wakaaladdu waxay ahaan doontaa mid madax bannaan oo jirid iyo awood sharci leh. Wakaaladdu waa inay u hoggaansanaataa sharciyada soo socda:
  - a) Sharciga tiradiisu tahay 16 soona baxay 1dii Abril 1970 ee xukuma Wakaaladaha Madaxa Bannaan sida uu maanta taagan yahay;
  - b) Sharciga tiradiisu tahay 36 soo baxay 22kii Abril 1972 ee ku saabsanaa Maamulka Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan;
  - t) Xerka Shaqaalaha Wakaaladaha Madax Bannaan (D.P.S.R.C. Lam. 74 ee 22kii Abril 1972) hadda kaddibna lagu tilmaami doono xeerka Shaqaalaha;
  - j) Xeerka tiradiisu tahay 58 ee soo baxay 31kii Luulyo 1972.
3. Wakaaladdu waxay gelayaa qaybta (B) (categoria B) ayddo taa micneheeda lagu caddeeyey xeerka shaqaalaha ee tiradiisu tahay 36 ee 22kii Abril 1972.

Qodobka 2aad

1. Wakaaladda ilaalinteeda guud waxaa yeelan doona Wasaaradda Ganacsiga Dibedda, oo hadda ka bacdi xeerkan lagu tilmaami doono Xoghavahav.

2. Haddii loo baahdo Xoghayuhu wuxuu bixin doonaa tilmaamo iyo tusaalooyin hoggaaminaya iyo siyaasadda guud ee Wakaaladdu ku dhaqmayso.

#### Qodobka 3aad

Xarunta Wakaaladda waxay ahaan doonta Muqdisho, laamana waxay ku yeelan kartaa Gobollada iyo Degmooyinka.

#### Qodobka 4aad

Guud ahaan, Wakaaladda waxaa loo xilsaaray iibgelinta xoolaha iyo wixii xoolahaas ka soo baxa, ama dalka gudahiisa ha ahaato ama dibeddiisa. Sidaa darteed, Wakaaladda waxa lagu xilsaaray:

- a) inay dhisto maamushana xeryaha naaxinta xoolaha beeca ah (Commercial feedlots).
- b) inay abaabusho dhistana seyladaha iyo wixii la xidhiidha habka u wanaagsan xoolaha iibgelintooda (Livestock Marketing Infrastructure).

#### Qodobka 5aad

Wakaaladdu waxay lahaan doontaa awood ay ku fuliso hawlaha qodobka 4aad lagu tilmaamay.

### QAYBTA II.

#### Qodobka 6aad

##### *Xubnaha Wakaaladda*

Xubnaha Wakaaladdu waxay ahaan doonaan:

- a) Guddida Maamulka (Management Committee);
- b) Maareeyaha Guud;
- t) Waaxyo ama qaybo ay Wakaaladdu yeelan doonto, kuwaasoo la abuuri doono marka xeer loo sameeyo dhismaha (stablishment) Wakaaladda.

#### Qodobka 7aad

Maareeyaha Guud iyo Maareeyayaasha Wakaaladda waxaa lagu qori doonaa xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka iyadoo lo tixgelinayo talada Xoghayaha.

#### Qodobka 8aad

##### *Xilka Maareeyaha Guud*

Xilka saaran Maareelaha Guud ee Wawaaladdu wuxuu yahay: inuu fuliyo waxa uu farayo sharcigan iyo wixii kale oo dhaqan sharci leh, siyaasadda iyo habka shaqada maamulkeeda.

QAYBTA III.

Qodobka 9aad

*Shaqaalaha*

Wakaaladdu way qoran kartaa wixii shaqaale ah oo ay u baahato iyadoo u hoggaansamaysa qaanuunka tiradoosu tahay 36 ee 22kii Abril 1972 iyo xeerkaa D.P.S.R.C. Lam. 74 ee soo baxay 22kii Abril 1972.

Qodobka 10aad

*Habka iyo Shuruudda Shaqada*

Habka iyo shuruudda shaqada, taasoo ay ku jirto mushaharka Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha Wakaaladda iyo shaqaalaha kaleba, waa xukumi doona qaanuunka Wakaalaha madaxa bannaan iyo xeerkaa shaqaalaha sida lagu soo sheegay qodobka 1aad, xarafaha «b» iyo «t» ee qaanuunka.

Qodobka 11aad

*Amaaho sharci ah*

Wakaaladdu si ay u hirgeliso hawlaheeda wax waa ka amaahan kartaa meelaha ku habboon ee lacagta lagu kaydiyo (Financial Institutions) waddanka Jamhuuriyadda Dimuqradiga ee Soomaaliya gudihiiisa ama dibeddiisa iyadoo haysata guddoonka Xoghayaha.

Qodobka 12aad

*Xisaabta Sannadka (Financial year)*

Sannadka maaliga ah ee Wakaaladdu wuxuu ka bilaabmayaa 1da Jannaayo kuna dhammaanayaa 31ka Diisambar, sannad walba.

Qodobka 13aad

*Miisaaniyadda iyo Xisaabta Xidhista Sannadka*

a) Maareeyaha Guud, iyadoo ayna ka dabayn karin 31ka Diisambar sannad walba waa inuu isku soo dubbarridaa miisaaniyaddii taasoo muujinaysa wixii soo geli kara ama ka bixi kara Wakaaladda sannadka soo socda. Bandhigga miisaaniyadda ee sanndaka waa in la hor dhigo Wasaaradaha Ganacsiga Dibedda iyo Lacagta.

b) Markay tahay 31ka Maarso ama inta ka horaysa sannad walba, Maareeyaha Guud waa inuu isku hagaajiyaa xisaabtii sannadkaa iyo bandhiggii macaashka ama khasaaraha Wakaaladda taana uu u soo gudbiyaa Wasaaradda Ganacsiga Dibedda iyo Wasaaradda Lacagta.

Qodobka 14aad

*Maamulka Xisaabta*

Wakaaladdu had iyo jeer, waa in maamul hagaagsan ay ku dhaqan gelisaa addunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan iyadoo si habboon u dhowreysa qaanuunka lambarkiisu yahay 58 ee soo baxay 31kii Luulyo 1972 iyo xeerarka Qaranka.

Qodobka 15aad

*Xisaabaha Wakaaladda Baadhiddooda*

Xisaabaha Wakaaladda waxaa baadhi doona Laanta gaarka ah ee ka tirsan Xafiiska Hantidhawrka ee Madaxtaayada Golaha Sare ee Kacaanka, loona sameeyey baadhista Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

Qodobka 16aad

*Sharciyada Gaarka ah (Regulation)*

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka wuu soo saari karaa sharci gaar ah si loo dhaqan geliyo qaanuunkan, isagoo tixgelinaya talada Xoghayahay.

Qoodoka 17aad

Xoghayuhu, isagoo la tashanaya Guddida Maamulka iyo Mareeyaha Guud, wuxuu samayn karaa sharciiga habka lagu dhaqan gelinayo fulinta hawlaha gudaha ee Wakaaladda.

Qodobka 18aad

*Tirid sharciyadii hore*

Wixii sharci ah ee ka hor yimaadda ama aan la soconin sharcigan, waa la tirtiray.

Qodobka 19aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa waqtigii uu saxeexo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka kaddibna waxa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 11 Nofember 1973.

*Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka

## **BOOGA LABAAD XEER DOWLADEED**

---

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

10 Settembre 1973, L. 107.

Dallacaad Saraakiil Boliska ah.

### **GUDDOONSHAHA**

#### **GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 5aad (Iambarka 4aad) ee Sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska lana soo saaray 23kii disambar 1972, kuna lambaransan 2;

ASAGOO ARKAY Warqaddii taariikhdeedu ahayd 27-8-1973 kuna lambaransanayd SEC-A-8-1 ee Taliyaha Ciidanka Boliska ugaga soo xogwarramay 4 Sarkaal ee ka mid ah Ciidanka Boliska asagoo soo jeediyay in la dallacsiyo;

ASAGOO DHEGEYSTAY Taladii Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha;

### **WUXUU XEERAY**

#### **Qodobka 1**

In Xiddiglayaasha Boliska ah ee hoos ku magacaaban la dallacsiyey, lana siiyey darajada laba Xiddigle marka laga bilaabo Setembar 1da 1973, kuna hirgaleysa xagga Sharciga iyo dhaqaalahaba:

1. — Xiddigle Cise Maxamed;
2. — » Cabdi Maxamed;
3. — » Maxamed Xaji Jaamac;
4. — » Axmed Cise Seraar.

#### **Qodobka 2**

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelaya, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10 Settembre 1973.

**MADAXWEYNAHA**

**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

*S. Gaas Maxamad Siyad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Gudaha

*S. Gaas Xuseen Kulmie Afrax*

Xoghayaha Dawladda ee Arrimaha Lacagta

*Takh. Maxamed Yusuf Weyrax*

*VISTO e registrato - Reg. n. 4, foglio n. 23.*

*Mogadiscio, li 11 Novembre 1973.*

*Il Magistrato ai Conti:*

*Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR*

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

10 Novembre 1973, L. 108.

Isbaddelkii Afraad ee Miisaaniyadda Sannadkan 1973.

**GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ISAGA OO ARKAY Go'aanki Golaha Sare ee Kacaanka;

ISAGA OO LA SOCODO Go'aankii Xoghayayaasba;

ISAGA OO ARKAY Qodobka 2 ee Xeerka Miisaaniyadda sannadkan 1973 ee sumaadisu tahay 3, 18kii Desember, 1972;

**Qodobka 1**

Isbaddelkii Afraad ee dhexe maray Madaxyeda Miisaaniyadda sannadkan 1973, sida aad arkateen waraaqada halkan ku xidhan (as in Annex A).

**Qodobka 2**

Xeerkani wuxuu u dhaqan galayaa si degdeg ah, waxaanu ka mid noqon doona Sharciyadda Dowladda Somaaliyeed, waana in lagu qoro faafinta rasmiga as ee Dowladda.

Muqdisho, 10 Nofembar 1973.

*Sareeyey Gass Mahamed Siyaad Barre*  
**GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda  
*Maxamed Yusuf Weyrax*



ISBADDELKII AFA AAD EE MIISAANIYADDA SANNADKA 1973  
(4th VIREMENT OF 1973 BUDGET)

Madax Head	Madx Xige Subhead	Tilmaan Description	Qiyaas hore Prov. estim.	Ishaddelka Change	Qiy. susub New estim.
Madax 1		Cashuurta wax soo saaridda iyo khara-shka (Taxes on production and expenditure)			
	6	Cashuurta Buriga iyo Taraqa (Tobacco and Matches)	40.000.000	+2.000.000	42.000.000
Madax 13	7	Warshadda Shamiintada (Investment for Gypsum)	1.000.000	— 150.000	850.000
»	»	» 6.1.8 Warshadaha yar yar (Investment in small scale industries)	1.000.000	— 650.000	350.000
»	»	» 6.1.11 Warshadda Birta Shubta (Investment in Foundry)	2.117.000	<del>1.000.000</del>	1.117.000
»	»	» 6.1.12 Horumarinta Kalluunka (Investment in Development of Fisheries)	3.450.000	—1.000.000	2.450.000
»	1 Madaxtooyada GSK	1.2.1 Mushaharka Shaqaalaha joogtada as	2.865.027	— 130.000	2.735.025
»	»	» 1.3.7 Abaal Gudyada	226.680	— 116.000	110.680
»	»	» 4.19.0 Qaadhaan (Subevtnion)	221.000	— 190.000	31.000
»	6 Wasaar. Warfaafinta	2.6.10 Alaabta warfaafinta (Parts and Acc. broadcasting)	1.500.000	— 400.000	1.100.000

Madax Head	Madx Xige Subhead	Tilmaan Description	Qiyaas hore Prov. estim.	Isbaddelka Change	Qiy. susub New estim.
» 17 Was. Macd. iyo Biy.	2.10.63	Horumarinta macdanta (Development of Mineral resources)	500.000	— 400.000	100.000
Madax 1 Madaxtooyada GSK	4.50.0	Iska-wax-u qabsada, Xafiiska Siyaasada Qaranka ee GSK	1.000.000	+ 890.000	1.890.000
» 2/V.2 Xabsiyada	3.1.1	Dhismaha Lanta Buur (Construction of Prison)	—	+ 86.000	86.000
» 4 Was. Arr. Gudaha	2.10.30	Kharashka caruurta Kacaanka (Social welfare institution expenses)	800.000	+ 600.000	1.400.000
» 5 » Gaashandhiga	2.0.0	Alaabta iyo Hawsha	26.200.000	+3.000.000	29.200.000
» 7 » Waxbarashada	1.2.1	Mushaharka shaqaalaha aan joogtada ahayn	15.128.712	+ 251.500	15.380.292
» 7 » »	1.2.3	Mushaharka shaqaalaha aan joogtada ahayn	3.109.987	+ 285.000	3.394.987
» 7 » »	1.3.7	Abaal Gud Aqoon	855.200	+ 45.500	900.700
» 7 » »	1.3.18	Abaal Guud Guri	604.896	+ 28.000	633.196
» 11 » Hawlaha Guud.	4.22.0	Horumarinta Wadooyinka (Project IV - High Development Programme)	825.100	+ 850.000	1.675.000

N. B. — Waxa kale oo lagu soo wareejiyey Dhismaha Xabsiga Laanta Buur lacag dhan So. Shs. 714.000/- oo laga soo wareejiyey curaarka — Dhismaha Boostadada cusub ee Muqdisho (Deposit Account of the Construction of new postal Headquarters). Lacagta lagu soo wareejiyey Laanta Buur isugeynteedu waa So. Shs. 800.000.

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

14 Nofembre 1973, L. 109.

Xeerka Ajuurada Maxkamadda ha.

**GUDDOONSHAHA**

**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

**ISAGA OO TIXGELINAYA** Go'aanki Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha Dawladda.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

Xerka hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

*Bixinta Ajuurada Maxkamadaha*

1. Ajuurada Maxkamadaha ee ku saabsan dacwadaha madaniga ah ee lagu sheegay qaybta 1aad warqad tilmaameedka la socoto Xeerkaan waa inta ay dhigayso qaybta 2aad ee warqad tilmameedka.

2. Hase yeeshe ma jirto wax ajuura ah ee la bixinayo marka Dawladda ama Laamaheeda, Wakaaladaha madaxbanaan iyo Dawladaha Hoose ey keensadaan dacwadaha madaniga ah.

3. Laakinse marka dacwadaha loo xukumo Dawladda amaba Laamaheeda, Wakaaladaha madaxbanaan iyo Dawladaha Hoose waa in lagu daraa ajuurada Maxkamadaha ee la bixin lahaa haddii u qof caadi ahi dacwada keensan lahaa.

Qodobka 2aad

*Uruurinta Ajuurada Maxkamadaha*

Lacagta ee ajuurada Maxkamadaha ee lagu sheegay qodobka 1aad waxaa loo geynayaa Kaaliyaha Maxkamadda ee wood u leh dacwada. Kaaliyaha lacagta qabta waa inuu bixiyaa rasiid iyo shahaadad muujinaysa lambarka iyo taariikhda rasiidka.

Qodobka 3aad

*Cafiska Ajuurada Maxkamaddaha*

1. Qofka dacwoonaya haddii u sheegto inuu haysan wax lacag ah ee uu ku bixiyo ajuurada Maxkamadda, waa inay Maxkamaddu arinta baadha.

2. Haddii ay Maxkamadda la noqoto inuu qofku run sheegayo oo ay caddaato in aanu wax lacag ah haysan, waa in ay amar bixisa in qofka

laga cafiyo ajuurada Maxkamadda dhammaan ama qayb sidii hadba ay garato. Marka qofkaas wax lacag ah ee laga qaadayo ma jirto.

3. Qofkaas haddii u ku guleysto dacwadiisa, Maxkamadda waa in ay soo saarta lacagta ee ajuurada ah uu bixin lahaa haddii aan laga cafin. Lacagtaas waa in laga qaada dhinaca kale ee lagu xukumo dacwadda (oo aan ahayn Dawladda, Laamaheeda, Wakaladaha madaxbanaan iyo Dawladaha Hoose). Lacagta waa in marka ugu horreeysa laga hela xoolaha ama maalka ku saabsan dacwada.

#### Qodobka 4aad

##### *Xeer-nidaamiyaha*

Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka isogoo qaatay rayigii Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta wuxuu Xeer Dawladeed (Decree) ku soo saaari karaa nidaamooyin (Regulation) lagu tixgelinayo Xeerkaan.

#### Qodobka 5aad

##### *Tirtir*

Xeerka hoos ku magacaaban waa la tirtiray:

- 1) Xeerka ku saabsan cashuuraatka tigidhaha (Sharci L. 6 soo baxay 7-12-1966) qaybta ku saabsan bixinta iyo uruurinta ajuurada Maxkamadaha.
- 2) Xeerka dhiska Maxkamadaha qaybta ku saabsan bixinta iyo uruurinta ajuurada Maxkamadaha dhinaca madaniga ah oo laga gaga dhaqmi jiray Gobolada Koonfur.
- 3) Sharci kasta oo khilaafsan ama ka hor istaagi kara Xeerkaan (ay ku jiraan warqadaha tigidhka leh iyo cashuuraatka xukunada).

#### Qodobka 6aad

##### *Dhaqangelid*

Xeerkaan wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda uu ku soo baxo Fafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 14 Nofembre 1973.

*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*  
GUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

WARQAD TILMAAMEEKDA

<i>Qaybata 1aad</i> <i>Dacwadaha madaniga</i>	<i>Qaybta 2aad</i> <i>Ajuurada</i>
1. <i>Dacwada la furayo.</i>	
1. ku saabsan lacag	5% ee tirada lacagta lagu dacweynayo.
2. ku saabsan maal ee lagu beddeli karo lacag	5% ee qiimaha maalka.
3. ku saabsan wax alla wixii aan la qiimeyn karin	Sh. So. 10/-.
2. <i>Rafcaan:</i>	
Marka la keenayo warqadaha rafcaanka ama arji ku saabsan dibufiirin, tix-raacid ama ku noqosho, Maxkamadda Rafcaanka ama Maxkamadda Sare.	
1. ku saabsan dacwadaha madaniga ah ee lagu xukumay lacag	3% ee lacagta tiradeed.
2. ku saabsan dacwadaha madaniga ah ee lagu xukumay maal ee lacag lagu beddelikaro	3% ee qiimaha tiradeed.
Hase yeeshe haddii u yahay ninka rafcaanka ka qaadanaya kii dacwada hore u furtay waxba laga qaadi maayo.	
3. <i>Fulinta:</i>	
Arji lagu weydiisanayo fulinta dacwada	1% ee tirada lacagta la xukumay.
4. Ajuurada warqadda lagu raadiyo dadka dacwada ku shuqul leh markasta u gaarsiiyo	Sh. So. 3/- maalintiiba oo la siinayo qof waliba.
5. <i>Ajuurada nuqul qaadista:</i> Nuqul run ah laga qaaday gal dacwo	Sh. So. 1/- boqolkii kilma-doo ama qaybtooda.
6. <i>Arjiyaal kale geddisan oo shabeysan (carta bollata):</i>	
1. loo qoray Maxkamadda Sare	Sh. So. 5/-.
2. loo qorayo Maxkamadda Rafcaanka	Sh. So. 5/-.
3. loo qorayo Maxkamaddaha Kale	Sh. So. 3/-.

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

3 Settembre 1973, L. 110.

Dhul la siiyey Xaji Farax Cali Cumar — ku fadhiya 900 mdh, kuna yaal Hodan.

**XOGHAYAHA DAWLADDA**

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda Kowaad iyo tii labaad ee Ka-caanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21kii Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 6 taarikhdeeduna aheyd 9 Jennaayo 1967;

ANNAGOO ARAGNAY Faafin Rasmi ah taarikhdeeduna tahay 12-2-1973, L. 1-2, oo caddeynayaa in Xaji Farax Cali Cumar la siiyey dhul Dawladeed ee ku fadhiya mdh. 900, kuna yaal Xafadda Waberi;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda hobsinada dhulka ay qortay Xafiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taarikhdeeduna aheyd 23-8-1973 wahay caddeyneysa in dhismaha iyo naqshadda L. 9936 bishii setember 3dii 1972 soona gudubtey fadhigii 12° — 7-9-1972 ay waafaqsantahay dhismaha guriga;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda so qortay Xafiska ku shaqa leh L. 284 oo Taarikhdxduna aheyd 11 Feb. 1973 caddeyneso dhismaha guriga oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

ISAGOO AQOONSADAY in waajibatikiisii innu ka bahay ninka kor ku soo shegnay;

**AMAR XEER**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaji Farax Cali Cumar la siiyey una gatay dhulka ah mq. 900, kuna yaal Hodan.

Muqdisho, 3 Settembre 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.  
*W. S. Gaashanle Sare M. S. Cusman*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 43.*  
*Mogadiscio ,li 16 Settembre 1973.*  
*Il Magistrato ai Conti:*  
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

15 Settembre 1973, L. 111.

Siismo dhul Dawladeed la siiyey Dr. Cabduraxman Xaji Murshid.

**XOGHAYAHA DAWLADDA**

ANNAGOO ARAGNAY Warqadaa Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanca iyo Qaynunkii Kowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 6 taarikhdeeduna aheyd Jannaayo 1967;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Cabduraxman Xaji Murshid taarikhdeeduna aheyd 1-1-63 — 13-10-1965, kuna yaal Wale Nord;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyay Xafiska ku shaqa lahaa, laguna dhabacay hashida rasmiga ah ee Dawladda L. 6-4 taarikhdeeduna aheyd 30 Aprile 1967;

ANNAGO ARAGNAY Ogolonishii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsan naqshadda dhismaha lambarkoodu yahay 3656 bishii Majo 1970 soona gudubtay fadhigii 4aad 13-4-1971;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradeedu tahay L. 22595 taarikhdeeduna aheyd 26-5-1971 in Cabduraxman Xaji Murshid uu dhibay Xafiska Canshurta Dawladda lacag tiradeedu tahay Sh. So. 900 (Sagaal-boqol); qiimihii dhulka ah;

ANNAGOO ARAGNAY Xanshadda ku saabsan siismaha dhulka lambartedu yahay MWD-3-23-378 taarikhdeedu yahay 29-5-1971 in ninka kor ku magacaabsan la siiyey dhul ku fadiyaa 600 mdh.;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

**AMAR XEER**

Waxaa la caddeynayaa in Dr. Cabduraxman Xaji Murshid la siiyey dhul Dawladeed ee ku faddhiya 600 mdh., kuna yaal Muqdisho — Xafadda Wale Nord.

Muqdisho, 15 Settembre 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.  
W. S. Gaashanle Sare M. S. Cusman

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 46.

Mogadiscio, li 22 Settembre 1973.

Il Magistrato ai Conti:

MAG. ABDULLAHI WARSAME NUR

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

13 Ottobre 1973, L. 112.

Siismo dhul la siyay Somali Commercial Bank — ku yaal Muqdisho Degmada Hodan.

**XOGHAYAHA DAWLADDA**

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi kowaad iyo tii labaad ee ka-caanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21 Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda tiradooda yihiin L. 037093 iyo 110504 ee tarikhoodana yihiin 21-12-1972 iyo 4-9-1973, ku saabsanaayeen weydiin dhul dawladdeed, sababtoo ah in Sombali Commercial Bank uu ku dhisto Xafisyo;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashada ah xubsiino dhulka ay soo qortay Xafiiska Farsamada Dhulka ee ka tirsan W.H.G. taarikheeduna aheyd 21 Agosto 1973;

**AMAR XEER**

**Qodobka 1aad**

Waxaa la caddeynayaa in Somali Commercial Bank la siiyey dhul Dawladdeed ee abirkiisuna yahay mt. 60x30 kuna fadhiya 1.800 mdh. ku yaal Muqdisho, Demada Hodan, Shodimo: Waqooye Jid; Konfur Jid; Galbeed Jid; Bari dhul Dawladed.

**Qodobka 2aad**

Somali Commercial Bank waxuu dhiibay qiimaha dhulka oo gaareyso Shs. So. 2.700, labo kun iyo todobo boqol) ee ay ku dhiibeen Xafiiska Faraca Canshuurta dadban, warqadda Lam. 107385 ee 2-10-1973.

Muqdisho, 13 Oktobar 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.  
*W. S. Gaashanle Sare M. S. Cusman*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 50.*

*Mogadiscio, li 18 Ottobre 1973.*

*Il Magistrato ai Conti:*

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR



## XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

16 Ottobre 1973, L. 113.

Hanti wareg guri ay leeyihiin Cali Axmed Moxamud Moxamed Delfa, Caddow Axmed Moxamud Moxamed Delfa, Moxamed Axmed Moxamud Moxamed Delfa iyo Xasan Axmed Mixamud Moxamed Delfa. Ku yaal Muqdisho — Xafadda Bondhere.

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Karqadda Kowaad iyo tii abaad ee Ka-  
caanka iyo Qaynunkii kowaad ee 21 Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Warqaddaha lamb. yahiin HPT-CM-52-Bs  
2883 iyo WPT-CM-52-Bs-3217 ee taarikhadooda yihiin 12-8-1973 iyo  
7-9-1973 ee soo qortay Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta oo ay ku  
weydiisaneeyso in loo qiimeeyo guriga ay layihiin Jaallayaasha ujeeddada  
ku qoron;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku saabsan qiimaha guriga ay  
soo farsameeyeen niman oo ka shaqeeya Waaxda qorsheynta iyo Hindi-  
saha ee Wasaaraddeyna taarikhdeeda tahay 8-8-1973;

## AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday Dan Guud ahaneed gurigee  
ay lahayeen Jaallayalka kor ku qoran iyado la siinayo magdhaw qiimahii  
la sooqaameyay lacag gaaresa 77.688,40, lacagta iyada ah waxaa ka  
go'aya 15% oo dhan Sh. So. 11.653,26, sida ay muujineyso (Preventio)  
ee Jaallayaalka iyaka ah waxaa u soo heraayaa lacag ku fadhiya Sh. So.  
66.035,14, iyado ay ku jirin qiimaha dhulka, lacagta waxaa laga bixiin-  
kara Amar — Xeer uu saxixo Xoghayaha Wasaaradda Lacagta.

Muqdisho, 16 Ottobre 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.  
*W. S. Gaashanle Sare M. S. Cusman*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 51.*  
*Mogadiscio, li 29 Ottobre 1973.*  
*Il Magistrato ai Conti:*  
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

## XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

18 Oòtoobar 1973, L. 114.

Siismo dhul la siyay Taliska Nabad Suggidda Somaliyeed. (N.S.S.) kuna yaal Muqdisho — Xafadda Wadajir.

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ANNAGOO ARAGNAY Xaashaddi Kowaad iyo tii labaad ee Ka-caanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21 Oktobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Waraqadda tiradeedu tahay NSS. AD. 1-11-18 taarikhdeeduna aheyd 30-9-1973, ku saabsan weyddin dhul Dawladeed sababtoo ah in Taliska Nabad Suggidda Soomaliyeed ku dhisto Xafiisyado;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda habsiimada dhulka ay qortay Xafiiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Wawlaha Guud, taarikhdeedunatahay 2-10-1973;

## AMAR XEER

Waxaa la caddeynayaa in Taliska Nabad Suggidda Somaliyeed (N.S.S.), la siiyay dhul Dawladeed ee cabirkiisuna yahay mt. 375x100 wuxuuna la mid yahay 37.500 mdh. kuna yaal — Muqdisho — Xafadda Wadajir.

Sohdimaha: Waqooyi Jid, Koofur Jid, Balbeed Jid, Bari W. Biyaha, W. Arrimaha Dibedda iyo W. Qorshaha.

Muqdisho, 18 Ottobre 1973.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda H. G.  
*W. S. Gaashanle Sare M. S. Cusman*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 52.*

*Mogadiscio, li 29 Ottobre 1973.*

*Il Magistrato ai Conti:*

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

**XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA**

23 Settembre 1973, L. 115.

Qiimaha Alaabta Dhismaha.

**XOGHAYAHA DAWLADDA**

AYADO LA ARKAY Go'aankii 1d kan 2d ee Kacaanka 21kii Oktobar;

OYADO LA ARKAY Sharciga Lamb. 17 ee soo baxay 17 Jannayo 1967 ee ku saabsana ilaalinta qiimaha gooynta Alaabta lagama maamanka ah;

**WAXA XEER LA DHIGAY**

Qodobka 1d

Sicirka Alaabta dhismaha waxay noqoondoontaa sida aanu u goynay ee hoos ku taal laga bilaabo 23ka Setembre 1973, Xeeerkaanu Muqdisho buu ku kooban yahay.

<i>Lamb.</i>	<i>Badeecadda</i>	<i>Sicir tafaariqeed Sh. So.</i>
1.	Soft Timber (Abete) m, 3,	1.640.00
2.	Hard wood (Larice) m, 3,	1.700.00
3.	Singapore (Timber) m, 3,	1.620.00
4.	Hardhoard (Masonite) 122x305	47.00
5.	» » 122x246	37.00
6.	Corrug. Iron Sheet (Lamiere) 0.16	11.00
7.	» » » » 0.20	12.00
8.	» » » » 0.27	15.00
9.	» » » » 0.30	16.00
10.	Binding Wire (Filo Ferro)	3.50

Qodobka 2d

Xeerka kor lagu soo sheegay wuxuu tirayaa xeer kasta ee hore oo ka soo horjeeda; wuxuu lagu faafindoona buugga Dawladda ee rasmiga ah.

Muqdisho, 23 Settembre 1973.

**XOGHAYAHA WASAARADDA**

*Iaalle Axmed M. Maxamuud*

**BOGGA SEDDEXAAD**  
**TALOOPYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH**

---

**DUUDUUBKA SHARIKADDA PRODMA LTD. KISMAAYO**

---

**OGEYSIIS**

Fadhi caam ah aan caadi ahayn Dadkii PRODMA Ltd. ashuunka ku lahaa waxa loogu yeedhayaa fadhi caam ah oo aan caadi ahayn. Fadhiga waxa lagu qabanayaa Xafiiska qareen Maxamud Sheikh Axmed ee Jaamicadda agteeda ku yaal bishu markay tahay 23ka December, 1973 casarka saacadda 2.30.

Waxa laga hadlayaa:

1. Shirkadda duuduubkeeda (Liquidation) iyo in la magacaabo nin ka shaqeeya duuduubkeeda (Liquidator).
2. Wixii arrimo ah ee kali kuna saabsan shirkadda.

Muqdisho, 29 Novembre 1973.

(200 bis)

**QAREEN MAXAMUD SHEIKH AXMED**

---